MIDNIMO ORGANIZATION
URURKA MIDNIMO

HL66169, Golis Street
Garowe, Puntland, Somalia
aajmagan@gmail.com
+1 763 501 5314

TAARIIKH November 12, 2025 MOWDUUC Doorashada 2026

MOWQIF · POSITION STATEMENT

Mowqifka Ururka Midnimo ee Doorashada 2026

Ururka Midnimo wuxuu aaminsanyahay in dalka laga qabto doorasho:

- Waqtigeeda ku qabsoonta,
- Wada-ogal lagu yahay,
- Daahfuran, oo hufan,
- Ka madaxbanaan fargelinta dowladda dhexe, dawlad goboleedaya iyo mid shisheeye.

> *Hal Xaaraan ah, Nirig Xalaal ah ma Dhasho*

Ururka Midnimo waxa uu si toos ah uga soo horjeedaa labada hannaan doorasho ee la qorsheynayo in dalka laga hirgeliyo oo kala ah:

A. Doorsahada kala-dhantaalan ee loogu magac daray qof iyo cod ama nadaamka axsaabta badan ee dawladda dhexe horseeka ka tahay.

B. Doorshadii 2022 ee aan kaalsoonida kasban ee dawlad-goboleeyadu ku amar kutaagleeyeen.

Ururka midnimo waxa halbeegiisa iyo bareerihiisa ku salaysanyahay sidan soo socota:

1. Suurtagal ma aha in ay qabsoonto doorasho Qof iyo Cod ah oo dawladda dhexe horseedka ka tahay, sababahaan hoose awgood:
    a. Nadaamka doorasho oo baalmarsan dastuurka dalka ee 2012.
    b. Xasilooni la'aanta amniga dalka.
    c. Looma diyaarsana doorasho Qof iyo Cod ah oo xor iyo xalaal ah.
    d. Dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada oo ku kala aragti duwan hannaanka doorashada.
    e. Habka loo xulay guddiga qaran ee doorashada oo baal marsan haykalka federalka (federalismka) iyo dastuurka dalka. (centralist tendency).

f. Axsaab tiradooda iyo sharciyadooda oo aan laga heshiin balse ku salaysan damaca Villa Somalia (authoritarian tendency).

g. Dowladda dhexe oo aan dalka intiisa badan gacanta ku hayn.

2. Doorshadii 2022 ee aan kaalsoonida kasban oo hogaamiyaasha dawlad-goboleedyadu hirgeliyeen.

   a. Qaabkii xidhibaanada loo xulay oo ka fog rabitaanka iyo madaxbanaanida beelaha.

   b. Hufnaantii iyo kalsoonidii loo qabay hannaanka doorashada ayaa barabaxay.

   c. Xildhibaanadii la xulay oo intooda badani aysan sinnaba u lahayn aqoon iyo khibrad haykal dowladeed.

   d. Waxaa habraaca doorashadu galaaftay kalsoonidii bulsho, sida kalsoonidii laguqabay madax-dhaqameeka, dowlad goboleedyada iyo dowladda dhexe . (Social disenfranchisement).

Hannaan Doorasho oo Leh Habraac Daahfuran oo Hufan

Waxaa Ururka Midnimo soo jeedinayaa in doorashada lagu qabto argtida hoos ku qoran:

1. In doorashada 2026 lagu saleeyo habraac ergo.
2. Habraac wadar ogol ah.
3. Habraac hufnaan sare leh oo daah-furan
4. In tirada ergadu noqoto 151 ergey. Tirada ergada oo korortaa waxay yareyneysaa musuq-maasuqa.
5. In ergada xildhibaanka dooranaysa ka timaado jifida kursiga leh.
6. In doosrahada lagu qabto deeganada beesha kursiga leh. Tusaale, in doorashada kuraasta Hiiraan lagu qabto Beledwene. Taasi waxay meesha ka saareysaa faragelinta dawlaada dhexe iyo dowlad goboleedyada.
7. Doorashada baarlamaanka iyo madaxweynaha federaalka waa in ay xor ka yihiin faragelin shisheeye.
8. Guddiga doorshadu waa in ay, dhan amni, dhaqaale iyo agaasimka doorashada u madax-bannaan yihiin, faragelin oo dhanna ka madax-bannaanyihiin.
9. In guddiga doorashadu leeyahay xarun u gaar ah oo araajida lagu qabto, taas oo aan ahayn xero ciidan, garoon dayaaradeed, madaxtooyo ama meel shacabka/murashaxiintu aysan geli karin.

10. In la dhiso (Seeso) maxkamad dastuuri ah ama maxkamad gaar ah oo kala saarta khilaafaadka arrimaha ama natiijada doorashada baarlamaanka iyo madaxweynaha federaalka.
11. Waa in la soo casuumo khuburo kor-joogteysa doorashada. Khuburo ka kooban gudo iyo dibadba, sida Jaamacahadaha iyo macadyada caalamiga ah oo daraasad ka soo saara sida doorashadu u hirgashay.
12. Dhigaalka musharaxnimadu waa $2,500.

Sharuudaha Murashaxa Xildhibaanka BFS ee dorashada 2026.

Markii si qoto-dheer loo darsey, muhiimada weyn ee “Xildhibaan”-ku u leeyahay, dib-u-yegleelida dowladnimada JFS,

- Markii la tixgeliyey in ay tahay waajib kuligeen ina saaran, in murashaxa “Xildhibaan”-ku yahay, qof leh kartida iyo akhlaaqda looga baahan yahay, ee ku aaddan gudashada waajibaadka shaqo ee Dastuuriga ah ee Xildhibaanka laga rabo,
- Ururka Midnimo wuxuu bulshada Soomasliyeed u soo jeedinayaa in qodobada hoos ku qoran laga dhigo shuruudaha laga rabo in musharraxa Barlamaanka FS buuxiyo.

1. In uu yahay muwaadin Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed
2. Aaminsan yahay midnimada dalka iyo qarannimada Soomaaliya.
3. Aaminsan yahay nadaamka dowliga ah ee “Federaalka.”
4. Dhimirkiisu u dhan yahay
5. Da'diisu ka yareyn 25 sano
6. Aan xuquugdiisa muwaadinnimo go'aan maxkamadeed lagu hakin shanti (5) sano ee ugu danbeysay.
7. Uu leeyahay ugu yaraan agoon dugsi sare ama waayo aragnimo u dhiganta.
8. In uusan ka tirsanayn ama wax xiiriir ah la lahayn kooxaha argagixisada ah
9. Inuusan xadin/lunsan hanti qaran.
10. Inuusan dhicin, xoogna ku haysan hanti muwaadin kale.
11. Inuu soo bandhigo hantidiisa - mood iyo noolba.
12. Inuu ka fayoow yahay isticmaalka mukhaadaraadka.

13. Inuu haysto warqadda danbi la'aanta ee hay'adda danbi baarista (CID) ee dalka.
14. Saraakisha/taliyayaasha cidamada, xubnaha guddiyada madaxabanaan ee Qaranka haddii ay tartamayaan waa in ay is-casilaan saddex (3) todobaad ka hor wakhtiga diwaangelinta musharaxiinta.
15. Musharax kasta oo u tartamaya Golaha Shacabka waa in uu bixiyaa lacagta (Dhigaalka) diiwan-galinta, kuna shubaa xisaabta bankiga ee Guddiga Doorashooyinka.
16. Dhigaalka diiwaan-galinta Musharaxiinta u tartamaya Golaha Shacabka waxay noqonaysa: $2,500 (lab kun iyo shanboqol oo dollar).
17. Dhigaalka diiwaan-galinta Musharaxiinta dib looma soo celinayo.

Qoondada Haweenka

Xildhibaanada Golaha Shacabku waa in ay noqdaan ugu yaraan 40% haween, taas oo xaqiijinteeda xil ka saranyahay gudiyada doorashooyinka GMDHDX yo GHDHF, Odayaasha dhaganka, Bulshada rayadka ah iyo Maamul Goboleedka.

- Beel/Jifo kasta oo saddex kursi leh, waa in mid loo asteeyo in ay ku tartamaan haween kaliya. Haddii beeshu kursiga u asteyn weydo murashaxiinta haweenka ah, waxaa masuuliyadda (shuruudda) agaasinkeeda yeelan doona Guddiga Maamulka Doorashooyinka ee heer ka Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federalka (GMDHDX) iyo Guddiga Hirgelinta Doorashooyinka heer Federal (GHDHF), ayagoo kaashanaya Dowlad Goboleedka uu kursigu yaalo.
- Haweenka waa u furan tahay inay u tartamaan kuraasta kale ee beesha.
- Ka noqoshada murashaxnimada - murashax kasta wuu ka bixi karaa tartanka wakhti kasta, ka hor inta aan la daabicin liiska murashaxnimada ee kama dambeysta ah, isaga oo buuxinaya Foomka Ogeysiinta Dib-uga-noqoshada Murashanimada. Haddii murashax uu dhinto kadib diiwangalinta murashaxa, balse wali aysan doorashadu dhicin waxaa xaqiijinaya GMDHDX, waxaana dib loo furayaa diiwaan-gelinta murashanimada, si uu hal murashax ku soo haro (baxo) tartanka kursigaas.

Guddoomiyaha Ururka Midnimo
Ururka Midnimo